# HAGAHA KAJAWAABIDA XAALAD DEGDEG AH EE QOYSASKA

Dugsiga Dagmada Magaalada Rochester waxoo leeyahay qorshoyaal xaalado degdeg ah oo faahfaahsan dhismo kasto oo dugsi ah. Waxaa iskaashi la samaynay sharci fulinta deegaanka iyo wakaaladaha dabka/caafimaadka si looga jawaabo si xaqiiq ah iyo wax qabad leh xaalad kasto. Haday xaalad halis ah ama xaalad degdeg ah dhacdo, waxaa la bilaabi doonaa jawaabta ku haboon. Fadlan ogoow in ardayda la sii DEYN DOONIN inta lagu jiro jawaabta xaaladaha degdeg ah.

Dugsiyada waxay qaban doonaan gambaleelo xaalado degdeg ah sanad dugsiyeed kasto: sideed gambaleelo oo faaruqin ah iyo afar gambaleelo oo khatar dhismaha gudihiisa ah. Lix gambaleelo oo faaruqin ah iyo labo gambaleelo oo khatar dhismaha gudihiisa ah waxaa la qaban doonaa inta u dhaxayso maalinta koowaad ee iskoolka ilaa December 31. Labada soo hartay ee faaruqinta iyo labada khatarta dhismaha gudihiisa waxaa la qaban doonaa inta u dhaxayso January 1 ilaa May 1. Daryeel bixiyayaasha waxaa la ogeysiin doonaa ugu yaraan todobo maalmood ka hor gambaleelada.

## SHELTER IN PLACE (MEESHA HOYGA)

Shelter in Place waxaa la bilaabaa si loo hoygeliyo ardayda iyo shaqaalaha dhismaha dhexdiisa si loo bixiyo ilaalin dhinaca deegaanka banaanka, sida cimilada. Ardayda iyo shaqaalaha waxay joogaan/loo hagaa fasalada, iyo waxbarashada waxay u socotaa si caadi ah. Xafiiska hore ma xirno iyo waxoo u furanyahay qof kasto oo hoy raadinaayo.

## EVACUATION (FAARUQIN)

Evacuation waxaa la bilaabaa markay jiraan xaalado amaan daro ah dhismaha iskoolka dhaxdiisa. Ardayda iyo shaqaalaha waxay ka faaruqaan dhismaha meel ka baxsan waxayna iskugu imaadaan meelo hore loo go'aamiyay. Faaruqinta meel ka baxsan banaanka ayaa laga yaabaa in laga maarmaan noqoto, taasna waxay ku xirantahay dhacdada. Maamulayaasha Degmada ayaa isku dubaridi doono u safrida goob u lugayn ama baska ardayda meelo ka baxsan kambaska. Macluumaadka ku saabsan dib u kulanka ardayda waxaa lala wadaagi doonaa qoysaska iyada oo la adeegsanaayo nidaamka fariimaha tooska ah ee Degmada.

## LOCKDOWN (KHATAR DHISMAHA GUDAHIISA)

Lockdown waxaa la bilaabaa si loo amni geliyo dhismaha iyo banaanka iskoolka inta lagu jiro dhacdooyin muujinaayo khatar degdeg ah oo rabsho ku ah gudaha iskoolka ama dhismaha kambaska. Ardayda iyo shaqaalaha waxay joogaan/loo hagaa fasalo ka fog albaabada iyo daaqadaha, kuwaas oo xiran iyo daboolan. Hawlaha fasalka way joogsadaan ilaa dhacdada dhamaato. Xafiiska hore waa la xiri doonaa, iyo taleefoonadana malaga jawaabi doono. Qof maloo ogalaan doono inoo soo galo ama kabaxo dhismaha. Sharci fulinta ayaa ogaysiin doonaan maamulka dugsiga marka xanibaada laga qaadi karo.

## Isgaarsiinta waa muhiim xaalad kasto oo degdeg ah. Maxaa samayn kartaa saa diyaar u ahaatid?

Xaalad degdeg ah, Degmada waxay kala xiriiri doontaa waalidiinta habka fariimaha tooska ah. Fadlan hubi in macluumaadkaaga xaaladaha degdega ah yahay mid cusbooneysiisan iyo usoo sheeg wixii isbedel ah ee taleefoon nambar, email, iyo cinwaanka guriga xafiiska weyn ee iskoolka caruurtaada.

## HOLD IN PLACE (MEEL QABSO)

Hold in Place waxaa la bilaabaa si loo xadido dhaqdhaqaaqa ardayda iyo shaqaalaha marka wax laga qabanaayo dhacdooyin waqti yar, sida xaalad caafimaad degdeg ah ama koronto la'aan. Ardayda iyo shaqaalaha waxay joogaan/ loo hagaa fasalada, iyo waxbarashada waxay u socotaa si caadi ah. Xafiiska hore ma xirno iyo woo furanyahay.

## SECURE LOCKOUT ( KHATAR DHISMAHA BANAANKIISA AMAAN LEH)

A Secure Lockout waxaa la bilaabaa si loo amni geliyo dhismaha iyo banaanka iskoolka inta lagu jiro dhacdooyin walaac dhow ka muujinaayo banaanka iskoolka ama kambaska. Ardayda iyo shaqaalaha waxay joogaan/loo hagaa fasalada, iyo waxbarashada waxay u socotaa si caadi ah. Hareeraha albaabada waxay ahaan doonanaan kuwo xiran iyo la kormeero. Sharci fulinta ayaa ogaysiin doonaan maamulka dugsiga marka xanibaada laga qaadi karo.

## FAMILY-STUDENT REUNIFICATION (DIB u KULANKA QOYSASKA-ARDAYDA)

Family-Student Reunification waa habka waalidiinta/mas'uuliyiinta lagu weydiin doono inay ka soo qaataan caruurtooda iskoolka ama meel kale oo rasmi ah, oo la xakumaayo sii dayntooda. Ardayda waxaa loo sii dayn doonaa KALIYA waalidiinta/mas'uuliyiinta ama qof weyn kuwaas oo ku qoran liiska xaaladaha degdega ah iyo tuso aqoonsi sawir ah.

## Maxaa samaynaysaa marka laguu soo sheego xaalad degdeg ah ee iskoolka canugaaga?

Waxaa waydiisaneynaa qoysaska INEYSAN imaanin iskoolka inta lagu jiro xaalad degdeg ah ilaa markii la faro. Iyadoo dareenkaaga dabiiciga ah ee xaaladaha degdega ah oo noqon karo inaa aadid iskoolka, fadlan fahan hadaa sidaas samaysid waxey si weyn u yareen kartaa awooda iskoolka inoo ka jawaabo xaalada iyo inoo farageliyo booliiska ama shaqaalaha kale ee xaaladaha degdega ah.